*The following **"Welfare Non-governmental Organisations Law – Law No: 43 of 2010"** was passed by the House of Representatives on 10 May 2010 and has now gone to the House of Elders. The first (incomplete) draft of this Law is available at the sponsoring Ministry's website at this link: http://slministryofplanning.org/ and was, at that time, called the "**Non-governmental Organisations Law**".*
**- www.somalilandlaw.com**

**GOLAHA WAKIILADA**

# XEERKA URURRADA SAMAFALKA EE AAN DAWLIGA AHAYN
***XEER/N0/43/2010***

## *GOLAHA WAKIILADDA J.S.L.*

**Markuu Arkay:** **Qodobada 10aad, 23aad , 39aad, iyo 78aad Dastuurka Qaranka JSL**.

**Markuu tixgeliyey:** **Baahida loo qabo in la helo xeer si hufan loogu maamulo Ururada Samafalka ee aan Dawliga ahayn**

## *WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN:*

**Qodobka 1aad**
**Eray Bixin**

**"Guddi"** Waxaa loola jeedaa Guddida Ururada samafalka aan dawliga ahayn (USDA)

**"Dan-Wadaag"** waxa loola jeedaa ardaa kulmiya Ururrada aan Dawliga Ahayn ee wadaniga ah (USDAW).

**"Diiwaan-geliye Guud"** waxa loola jeedaa Agaasimaha isu-duwidda Ururrada aan Dawliga Ahayn (USDA)

**"Diiwaan-geliye"** Waxaa loola jeedaa diiwaan-geliye Qaran, Gobol ama Degmo.

**"Ururrada aan Dawli ahayn ee  Caalamiga ah (USDAC)** waxa loola jeedaa Ururrada aan Dawliga ahayn shisheeye ee ka sharciyeysan wax kabadan hal dal oo shisheeye.

**"Ururrada aan Dawliga ahayn ee shisheeye (USDASH)":** waxaa loola jeedaa Ururrada aan Dawliga ahayn ee ka sharciyaysan hal dal oo shisheeye

**"Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah (USDAW)** waxa loola jeedaa Ururrada Waddaniga/sokeeye ee ka diiwaan gashan dalka kana hawl gala dalka.

**"Urur aan Dawli Ahayn"** (USDA) waxa loola jeedaa shakhsiyaad iskood isku diray ama isu abaabulay ama isu-bahaystay,  kana madax-bannaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed,  dhex-dhexaad ah, oo aan macaash doon ahayn. kuwaas  oo noqon kara heer Caalami, Qaran,  Gobol,  Degmo iyo tuulo (community-based organization),  Ururradaas oo uu dhisan  inay u adeegaan xubnahooda  iyo bulshadaba kana shaqeeya hagaajinta adeegyada bulshada (social services), xaaladaha bani'adamnimo ee deg-degga ah (humanitarian issues), horumarinta, ilaalinta deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah, maamul-wanaagga, ilaalinta xuquuqda, daryeelka iyo kor-u-qaaddida nolosha bulshada (livelihoods),  tababarrada aqooneed iyo  kobcinta tayada iyo hourmarinta joogteysan.

**"Aan Macaash-doon ahayn"** Waxa loola jeedaa ka durugsan dheefsasho  ama faa'iido shakhsi-ahaaneed, waxa se jiri kara shaqaale mushahaaraysan ama dhaqdhaqaaq dakhli-abuurineed oo faa'iidadeeda lagu celin doono horumarinta bulshada iyadoo loo maraayo wax-qabadka Ururrada aan Dawliga ahayn (USDA).

**"Ka madax-bannaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed"** Waxa loola jeedaa ururradu inaanay raadsan awood siyaasadeed (political power) isla markaana aanay u ololeyn xisbiyo siyaasadeed.

**"Wasiir"** Waxaa loola jeeda Wasiirka Qorsheynta Qaranka, Isu-duwidda iyo xidhiidhinta Ururrada Caalamiga ah ee masuuliyaddu ka saaran tahay Ururrada aan Dawliga Ahayn.

**"Wasaarad"** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Isu-duwidda iyo Xidhiidhinta ururrada Caalamiga ah.

**"Diiwaan"** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu keydiyo xogaha Ururrada aan Dawliga Ahayn.

**"Sarkaal  Xukuumadeed"** waxaa loola jeedaa mas'uul  Xukuumadeed oo lagu magacaabay Qodobka 3$^{aad}$, xubintiisa 1$^{aad}$ iyo Qodobka 15$^{aad}$ xubintiisa 1$^{aad}$

**Qodobka 2aad**
**Magaca xeerka**

1. Xeerka waxaa loogu yeedhayaa hadda ka dib xeerka ururada Samafalka aan Dawliga ahayn (USDA).

2. Xeerkan waxaa lagu maamulayaa urur kasta oo aan Dawliga ahayn, madaxabanaan, macaash doonka ahayn, oo ka kooban ururada aan dawliga ahayn ee wadaniga ah (USDAW), Ururada aan Dawliga ahayn ee dalalka shisheeye (USDASH) iyo Ururada aan Dawliga ahayn ee Caalimiga ah (USDAC).

3. Waxaa kale oo xeerkan hoos imanaya daladaha (Umbrellas), midawga iyo bah-wadaagaha Ururadaas aan Dawliga ahayn.

4. Xeerkan ma hoos imanayaan hay'adaha Qaramada Midoobay;Urarada xirfadeed ama mihnadeed, Ururada bulsho ee aan samafalka hawshoodu la xidhiidhin, ururada ganacsi, wershadeed ama shaqaale.

**Qodobka 3aad:**
**Ulajeedooyinka Xeerkan:**

1. Inu u dhiiri-geliyo sidii Ururadda Samafalka ee Aan Dawliga aheyni, si hufan oo mug-leh uga qeyb-qaadan lahayeen, horumarka dalka.
2. In laga dhigo ururada ha'yado sharci ah (legal Personality).
3. In la iskuduwo hawlaha horumarka ee ay uruada Bulshada ee aan Dawliga aheyni qabtaan si loo waafajiyo qorshaha qaranka iyo siyaasada dalka ee ku wajahan Horummarka Dalka.
4. In la dhiirigeliyo ururaro bulsho oo xoog ah oo madaxbanaan.
5. In la hagaajo xalibnaanta iyo la xisaabtanka (Transparency & Accountablity) -ga USDA.

## QEYBTA 2aad
## MAAMULKA IYO ISU-DUWIDDA URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN

**Qodobka 4aad**
**Abuurista Guddida Qaran ee Ururada Samafalka ee aan Dawliga aheyn:**

1. Xeerkani waxa u si rasmi ah u abuuraya Guddi Qaran oo Magaciisa la yidhaahdo: "Guddida Qaranka ee Urrurada Samafalka aan Dawliga Aheyn" (USDA).
2. Guddigu waxay ka kooban yihiin 7 xubnood oo kala ah:
   b) Laba (2) xubnood oo dadwaynaha lagaga soo xulo aqoontooda horumarineed, waayo aragnimadooda hawlaha samo-falka, waxaana soo magacaabi Wasiirka .
   t) Laba (2) xubnood oo kasoo jeeda Dan-wadaagta metelaysa danaha Urrurada aan dawliga ahayn oo shirwaynaha dan-wadaagta lagu soo magacaabayo;
   j) Hal (1) Xubin oo si kaltan ah ay u soo magacaabaan Dalladaha Naafada, Haweenka iyo Dadka laga tirada badan yahay.
   k) Laba xubnood oo Saraakiisha Wasaarada ka tirsan oo midkood yahay diiwaangeliyaha guud.
3. Guddigu waxay iska dhex dooranayaan fadhigooda ugu horeeya Gudoomiye iyo Gudoomiye ku xigeen, xoghayaha Guddiguna waa diiwaangeliyaha guud.
4. Guddida muddada xilkoodu waa sadex sano hal mar oo keliya ayaa dib loo dooran karaa.
5. Guddida ugu horeeya Wasiirka ayaa xubnaha Ururada Samafalka aan Dawliga ahayn ee wadaniga ah ka dhex magacaabaya labada xubnood ee Dan-wadaagtu soo magacaabi lahayd

**Qodobka 5aad**
**Waajibaadka iyo Xilalaka Guddida Qaran ee USDA:**

1. Isaga oo gudanaaya waajibaadka lagu qeexay Xeerkan, Goluhu waxa uu ku dhaqmi doonaa nidaam wada tashi, isu-duwid iyo is-kaashi uu la yeesho Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale.

2. Xilalka Golaha waxa ka mid noqon doona:
   - b. In uu ogolaado, go'aan ka gadho diiwaan gelinta Ururrada aan Dawliga Ahayn;
   - t. In uu fududeeyo horumarka iyo hirgelinta hab-dhaqanka iyo siyaasadda (policy) Ururrada aan Dawliga ahayn;
   - j. In uu fududeeyo wax-qabashooyinka Ururrada aan Dawliga ahayn;
   - x. In uu darso warbixinaha Ururrada aan Dawliga ahayn, talooyina ka soo jeediyo;
   - Kh. In uu xukuumadda kala taliyo hawl-galada Ururrada aan dawliga ahayn iyo doorkooda ka qayb-qaadashada horumarineed;
   - d. In uu u tilmaamo, talo siiyo Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) siyaasadda hagaysa (policy guidelines) isna waafajinaysa wax-qabadkooda horumarineed ee waafaqsan qorshaha Qaranka;
   - r. In uu fududeeyo is-waraysiga iyo wada-tashiga isla markaana ku wacyi-geliyo wada shaqaynta u dhexaysa Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) iyo Xukuumadda;
   - s. In uu baadhitaan iyo waraysi ku sameeyo ku dhaqanka dastuurka uu leeyahay urur kasta oo ka mid ah ururradaas aan Dawliga ahayn;
   - Sh. Inuu maareeyo (xaliyo) khilaafka ka dhex abuurma urur gudihiisa ama laba urur dhexdood ama in ka badan;
   - dh. In uu go'aan ka gaadho derajooyinka Ururrada (Waddaniga ah) ee aan Dawliga ahayn. Kuwaas oo u kala bixi doona derejooyinka A, B,C&D iyadoo la waafajinaayo sharciyadda, raad-raaca taariikheed, waxqabadkooda, iyo tirada Gobolada iyo Degmooyinka ay ka hawl galaan;
   - c. In uu anshax-mariyo USDA
   - g. In uu baadho go'aan ka gaadho maamul-xumo (mismanagement) ama dhaqan-xumo (misconduct) laga soo sheegey USDA.
   - f. In uu dhiiri-geliyo hufnaanta maamulka (administration) iyo xalibnaanta (transparency) USDA
   - q. In uu kormeero, waxqabadka Ururada aan Dawliga ahayn
   - k. In uu la socdo, dusha ka eego, ka warbixiyo, hawl-qabadka Diiwaangeliyaha guud, diiwaangeliyaha heer Gobol iyo heer Degmo
   - l. In uu warbixin iyo tallooyin ka soo jeediyo dhammaan arrimaha la xidhiidha USDA
   - m. In uu kala taliyo, ku dhiirigeliyo Wasaarada diyaarinta xeer-nidaamyada wareegtooyinka iyo amarada xeerkan lagu fulinayo
   - n. In uu abaabulo, kormeero ka warbixiyo shirwaynaha Dan-wadaagta USDAW
   - w. Hawlaha kale ee xeerku u xilsaaro ama Wasiirku u igmado

**Qodobka 6aad**
**Waajibaadka Wasaarada Qorshaynta Qaranka**

1. Wasaaradda Qorsheynta Qaranka ayaa uga wakiil ah Dawladda JSL Diiwaan-gelinta, Maamulka iyo Isku-dubaridka ururrada aan Dawliga ahayn ee wadaniga, shisheeye ama Caalamiga ah.

**2.** Wasaaraddu waxay u xilsaaran tahay:

b. Waa tan keliya ee metalaysa xukuumadda ee u xil-saaran diiwaan-gelinta Ururrada aan Dawliga ahayn ee Caalamiga/Waddaniga ah ama shisheeye ee ka hawl gala Somaliland gudaheeda.

t. Masuul ka tahay kala doorashada goobta ama goobaha hawlgalka ee Ururku ka hawl geli karaan waxayna ku salaynaysaa baahiyaha gobolada iyo degmooyinka dalka oo dhan iyadoo la raacayo qorshaha guud ee horumarineed, si la isugu dheelli-tiro horumarinta bulshada - taas oo lagala tashan doono Ururka hawl gelaya.

j. U taagan tahay bar-kulan isgaadhsiineed oo u dhexeeya xukuumadda Somaliland iyo Ururradaas. Dhammaan xidhiidhka qoraallada ah ee dhex mara Wasaaradaha iyo Ururradaas, waxa nuqul la siinayaa Wasaaradda.

x. Isku-xidhida Ururrada, maamullada Gobollada, degmooyinka, Wasaaradaha wada-shaqayntu ka dhexayso iyo hay'adaha kale ee Xukuumadda si wada shaqayn wanaagsan loo helo.

Kh. Taageerida wax-qabadka Ururradaas, ilaalinta hantidooda si loo xaqiijiyo ujeedooyinkii mashaariicda Ururradaasi maal-geliyeen, si waafaqsan heshiis-wadareedkii la wada galay.

d. U soo ban-dhigaysaa war-bixinnada qiimeynta ee ay Wasaaraddu ku samaysay hawlahooda, si ay dib-u-eegid iyo faallo ugu sameeyaan ka hor intaan la gebo-gebayn qiimeyntaas.

r. U fududeynta sameynta cashuur-dhaaf soo dejinta agabka xafiisyada iyo qalabka mashaariicda laga fulinayo dalka gudihiisa, Haddii Ururku hanti gaar ahaaneed uu la soo wareego ama dalka la yimaaddo qalab culus (heavy machinery) sida cagafyo iyo qalabka macdanta iyo batroolka lagu baadho iwm oo uu u baahan doono inuu dib ula noqdo, waa inuu caddeyn keenaa inta aanu hawl-galkiisa bilaabin, si loogu fududeeyo sharciyadda dib-ula-noqoshada.

s. U fududeynta alaabta kale ee u baahan cashuur-dhaaf looguna talo-galay inay ka gudbaan soohdimaha Somaliland, si waafaqsan shuruucda dalka. Xaqiijinta dokumantiyada la xidhiidha codsigooda waxa u xil saran Wasaaradda iyadoo la tashanaysa Wasaaradda Maaliyadda.

Sh. Ka caawinaysaa shaqaalaha shisheeye ee u shaqeeya Ururradaas cashuur-dhaafka agabka shakhsi ama qoys ee ay dalka la yimaaddaan iyo dib-ula-noqoshadooda, si waafaqsan sharciga.

Dh. U fududeynaysaa soo-gelidda Somaliland iyo deganaansho qaanuuni ah (legal residence) khubarada shisheeye ee Ururadaas aan Dawliga ahayni uga baahan doonaan fulinta mashaaricdooda, iyadoo la waafajinayo xeerka shaqaalaha rayidka.

c. Waxay masuul ka tahay xog-siinta, tilmaamidda iyo hawlaha isu-duwineed ee Ururrada Caalamiga/shisheeye/Waddaniga ah ee dalka ka hawl gala.

g. Taageerida, gacansiinta, tayaynta iyo horumarinta USDAW.

f. Dejinta iyo soo saarista xeer-nidaamyada, wareegtooyinka, hagayaasha iyo amaradda lagu maamulayo USDA

q. Hawlaha kale ee sharcigu u xilsaaro

**Qodobka-7aad**
**Waaxda isu duwida iyo diiwaangelinta ururada aan Dawliga ahayn**

1. Wasaarada Qorshaynta iyo isu-duwidu waxay yeelanaysaa Waax qaabilsan maamulka, isu duwida iyo diiwaangelinta ururada aan Dawliga ahayn.
2. Agaasimaha waaxdan wuxuu noqonayaa diiwaangeliyaha guud ee ururada aan Dawliga ahayn.
3. Waaxdani waxay xidhiidhinaysaa Ururada aan Dawliga ahayn iyo xukuumada.

**Qodobka- 8aad**
**Xilalka iyo Waajibaadka Diiwaangeliyaha Guud**

Xilalka iyo waajibaadka diiwaangeliyaha guud waxay noqonayaan kuwan soo socda:
1. In uu talo ka bixiyo siyaasadaha iyo qorshayaasha lagu maamulayo ururada aan dawliga ahayn.
2. In uu diiwaangeliyo ururada aan dawliga ahayn.
3. In uu hirgeliyo dhaqangalka xeerkan.
4. In uu hayo, xafido, ilaaliyo diiwaanka guud ee ururada aan Dawliga ahayn
5. In uu isku xidho, xidhiidhiyo Wasaarada iyo ururada aan Dawliga ahayn.
6. In ururuyo warbixinaha ururada aan dawliga ahayn.
7. In uu u gudbiyo ururada aan Dawliga ahayn, shuruucda dalka, siyaasadaha xukuumada iyo qorshayaasha qaranka ee hawshooda khuseeya kuna dabagalo hirgelintooda.
8. In uu la socdo, dabagalo wax qabadka ay fulinayaan ururada aan dawliga ahayn
9. In helo, kaydiyo, diiwaangeliyo oo la socdo heshiisyada ururada aan Dawliga ahayn ee shisheeye ama Ururada aan Dawliga ahayn ee Caalamiga ah ay la galaan Wasaaradaha/haya'adaha ay shaqo wadaaga leeyihiin.
10. In uu xaqiijiyo shuruudaha diiwaangelinta iyo sharcinimada ururada aan Dawliga ahayn.
11. In uu xoojiyo iskaashiga uu la leeyahay qaybaha Wasaarada, wasaaradaha kale iyo xafiisyada kale ee arrimaha la xidhiidha ururada aan Dawliga ahayn.
12. In hirgeliyo go'aamada guddida USDA
13. In uu ka warbixiyo ururada aan Dawliga ahayn
14. In uu fududeeyo gudashada waajibaadka Wasaarada ee ku qeexan Qodobka 6aad ee xeerkan.
15. In uu hawlgeliyo, maamulo oo kormeero shaqaalaha hoos yimaada Waaxdiisa.
16. In hawlaha waaxdiisa la socodsiiyo, lana wadaago hawlqabadka waaxdiisa masuuliyiinta sarsare ee Wasaarada.
17. In uu xoghayn u noqdo Guddida USDA ee xeerkan ku qeexan.
18. In uu fuliyo hawlaha kale ee xeerku u xilsaaro, ama wasiirka ama Agaasimaha guud.

**Qodobka: 9aad**
**Diiwaanka Ururada aan Dawliga ahayn**

1. Waxaa la abuurayaa diiwaan guud oo lagu qoro dhammaan ururada aan Dawliga ahayn ee xeerkani nidaaminayo.

2. Diiwaanka guud waxaa qayb-qayb loogu diiwaangelinayaa Ururada aan dawliga ahayn ee wadaniga ah (USDAW), ururada aan Dawliga ahayn ee shisheeye (USDASH), Ururada aan Dawliga ahayn ee Caalamiga ah (USDAC) iyo Dalladaha Ururadaa.
3. Diiwaanka waxaa lagu qorayaa ururka marka shahaadada la siinayo
4. Diiwaanka guud waxaa loo xidhayaa sanad sanad, iyadoo lagu xusayo diiwaanka taariikhda la diiwaangeliyay ururka.
5. Ururka aan dawliga ahayn ee sanadka dhexdiisa laga laalo shahaadada ama lagala noqdo shahaadada, waxaa laga saarayaa diiwaanka magaciisa, iyadoo la xusayo sababta laalista ama kala noqoshada, marka ay dhamaato mudada cabashu ama la diido cabashadiisa haddii shahaadadiisa lagaga laalay si xeerkan waafaqsan.
6. Ururka laga hakiyo shahaadada sanadka dhexdiisa ama laga qaado talaabo kale oo anshaxmarin waxaa lagu xusayaa diiwaanka hakintaa ama talaabada kale ee anshax-marin ee laga qaatay.
7. Ururka aan Dawliga ahayn ee loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan, waxaa lagu qorayaa diiwaanka waxyaabahan:
   - b. Magaca ururka aan Dawliga ahayn
   - t. Xaruntiisa, xafiisyada laamihiisa, ciwaankiisa,Guddida hogaamiya iyo Agaasimaha fulinta ama cidda u dhiganta qaab-dhismeedkiisa iyo ciwaanadooda.
   - j. Wadaaga (sectors) uu ka shaqeeyo, degaanka uu ka hawlgalo
   - x. Hay'adaha, Wasaaradaha ama ururada uu la shaqeeyo
   - Kh.Dalka ama dalalka kale ee uu ka diiwaangashan yahay
   - d. Lambarka shahaadada iyo taariikhda diiwaangelinta
   - r. Muddada shahaadada diiwaangelinta
   - s. Iyo macluumaad kasta oo kale oo lama huraan ah.
8. Urur walba oo aan dawli ahayn oo loo diiwaangeliyo si xeerkan waafaqsan wuxuu yeelanayaa fayl lagu kaydiyo macluumaadkiisa.

**Qodobka- 10aad**
**Waajibaadka Ururadda aan Dawliga ahayn**

Urur kasta oo aan dawli ahayn oo si xeerkan waafaqsan lagu diiwaangeliyo waxaa waajib ku ah:
1. In ixtiraamo, aqoonsado madaxbanaanida, aayo-katashiga Qaranimada JSL, dhaqanka iyo caqiidada ummadda JSL
2. In uu ixtiraamo, kuna dhaqmo Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyada Somaliland, una hogaansamo siyaasadaha xukuumadeed iyo talooyinka xukuumada ee ku wajahan wax-qabadkooda.
3. Barnaamijyada Ururrada Samafalka aan dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan).
4. In hantidiisa, kharashkiisa, dakhligiisa uu u adeegsadaa oo keliya ujeedadiisa macaash raadis la'aanta oo sharuucda dalka waafaqsan.
5. In dhammaan hawlihiisu noqdaan kuwo lawada-arki karo (transparent) oo dabagal (accountable) leh, waana in uu si caqligal ah u bixiyaa mushaharada/gunnooyinka shaqaalaha, kirooyinka guryaha/gaadiidka iyo kharashaadka maamul iyo wax soo iibsi, si uu u kasbado kalsoonida dadwaynaha.

**Qodobka- 11aad**
**Arrimaha ka reeban Ururada aan Dawliga ahayn**

Ururada aan Dawliga ahayn, waxaa ka reeban:

1. Ka qaybgalka hawlaha siyaasadeed iyo ololayaasha Doorashooyinka siyaasadeed ee si gaar ah loo gacansiinayo urur ahaan, urur/xisbi siyaasadeed ama musharax/musharaxiin doorasho siyaasadeed
2. Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase, iska hor imaad gacan ka hadal leh ama dagaalo iyo ka qaybqaadasho hawlo ciidan ama tababaro ciidan.
3. Keenid, soo dejin, samayn, ka ganacsi hub iyo waxyaabaha qarxa.
4. Ka qaybqaadasho, caawin ama gacansiin iyo dhiirigelin argagixiso iyo falal argagixiso
5. Ku hawlanaan ama caawin soo saaris, beerasho, safayn, dhoofin, soo dejin, kaydin, ka ganacsi, haysasho, isticmaal ama qaybin maandooriye.
6. In loo isticmaalo dhaqaalaha iyo hantida ururka, wax kasta oo lid ku ah danaha qaranka, ciqiidada diimeed, anshaxa bulshada, caafimaadka, xasiloonida qaranka ama wax kasta oo ku wajahan qabyaalad iyo takoor.
7. In dhaqaalaha iyo hantida ururka loo adeegsado hawlo ganacsi.
8. Fal kasta oo kale oo ay reebeen shuruucda JSL.

## QEYBTA 3AAD
## ASAASKA, DIIWAAN-GELINTA URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN EE WADDANIGA AH (USDAW)

**Qodobka-12aad**
**Asaaska Urur aan Dawli ahayn oo wadani ah**

1. Haddii aan xeerku si kale u tilmaamin Urur aan Dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan shan qof oo muwaadiniin ah ama ajinebi dalka rasmi u degan ah ama muwaadiniin iyo ajinebi intooda badan dalka degan yihiin oo wada jira.

**Qodobka – 13aad**
**Shuruudaha diiwaan-gelinta**

1. Urur kasta oo aan Dawli Ahayn oo Waddani ah waa inuu is-diiwaan geliyaa iyadoo la raacayo shuruudaha Xeerkan.
2. Waa in uu leeyahay xafiis shaqeeya iyo ciwaan sugan, magac u gaar ah iyo astaan u gaar ah
3. Waa in uu leeyahay xeer hoosaad uu garyaqaan soo ansixiyay, dhammaan xubnaha aasaasayaashu ku saxeexan yihiin
4. Waa in uu leeyahay qaab-dhismeed awoodahiisu kala qeexan yihiin
5. Waa in xubnihiisu aqoon iyo waaya'aragnimo u leeyihiin wadaagaha/wadaagyada uu ka shaqaynayo

6. Waa in hadafkiisa, ujeedadiisa iyo hawlaha uu rabo in uu ka shaqeeyo ay waafaqsan yihiin xeerarka dalka,

7. Waa in uu Diiwaangeliyaha u soo qortaa codsi ay ku qeexan tahay:

    b) Magaca ururka, xarfaha loo soo gaabiyo (markay jiraan), xarunta iyo laamaha ururka (markay laamo jiraan), ciwaanka ururka oo ku jiraan telefano iyo sanduuqa internetka
    t) Magacyada xubnaha asaaseyaasha ururka.
    j) Ujeedada ururka iyo wadaaga/wadaagyada uu ka shaqaynayo
    x) Degaanada uu ka hawlgelayo
    Kh) Xubnaha Guddida Hogaaminta iyo xubnaha maamulka

8. Codsiga diiwaangelinta waa in ay ku saxeexan yihiin xubnaha asaasayaasha ama cid ay awood u siiyeen

9. Codsiga diiwaangelinta lagu dalbanayo waa in ay weheliyaan:

    b) Nuqul ka mid ah dastuurka ururka.
    t) Faahfaahin kooban oo khuseysa magacyada iyo saxeexyada xubnaha asaasayaasha;
    j) Taariikh-nololeedka asaaseyaasha (CV) iyo sawiradooda iyo caddayn dembi-la'aneed;
    x) Rasiidhka bixinta cashuurta diiwaangelinta

## Qodobka-14aad
## Dastuurka Ururka

Xeerka ururka aan Dawliga ahayn waa in ay ku qeexan yihiin:

b. Magaca rasmiga ah ee Ururka oo aan hore loogu diiwaangelin urur hore oo aan Dawli ahayn, shirkad ama cid kale.
t. Hadafka, ujeedada iyo hawlaha Ururka
j. Tirada xubnaha asaaseyaasha, haddii lagu biiri karo hab-raaca loogu biiri karo iyo habka la isaga saari karo.
x. Hab-raaca doorashada Golaha/Guddida hogaaminta iyo luminta xubinimada Golaha/Guddida hogaaminta.
Kh.Sida shirarka loo qabanayo
d. Awoodaha iyo masuuliyadaha shirwaynaha (marka uu jiro) iyo Golaha/Guddida hogaaminta.
r. Habka Doorashada, xulashada ama magacaabista Maamulka ururka iyo awoodaha maamulka

## Qodobka-15aad
## Ogolaanshaha & diidmada diiwaangelinta USDAW

1. Diiwaangeliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee USDAW, wuxuu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka 14aad ee xeerkan uu buuxiyay, isagoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:

    b) In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama dhukumenti ka dhiman
    t) In uu dalbado ama raadiyo cadaymo dheeraada ah

2. Diiwaangeliyuhu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, wuxuu u gudbinayaa Guddida USDA, codsiga oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baadhistiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.

3. Guddigu, markuu helo macluumaadka faqrada 2aad, wuxuu ka doodayaa jawaabna ka bixinayaa codsiga diiwaangelinta USDAW, iyadoo Guddigu ku soo saari kara go'aan sababaysan oo aqlabiyad ah:

b. In USDAW ee diiwaangelinta soo dalbaday uu u qalmo in la diiwaangeliyo marka uu ku qanco, In uu buuxiyay shuruudaha xeerka ku qeexan, In Dhammaan macluumaadkiisu dhab yihiin.

t) In USDAW ee diiwaangelinta soo dalbaday aanu u qalmin in la diiwaangeliyo, marka ay u cadaato, in aanu buuxin shuruudihii xeerku u dhigay, in aanay dhab ahayn macluumaadka uu soo gubiyay.

j) In baadhis dheeraada iyo cadaymo kale oo lagu go'aan qaato loo baahan yahay

4. Guddigu marka uu gaadho go'aamada ku qeexan xubnaha (b&t) ee faqrada 3aad ee qodobkan, waxay go'aankooda ogolaashaha diiwaangelinta ama diidmada u gudbinayaan Diiwaangeliyaha oo:

b. Marka go'aanku yahay ogolaansho, ku qoraaya diiwaanka, una furaya fayl, una soo saaraya Shahaadada Diiwaangelinta

t. Marka uu go'aanku yahay diidmo nuqul ka siinaya codsadihii

5. Codsade kasta oo aan ku qancin go'aanka Guddida USDA, wuxuu cabasho u qoran karaa Wasiirka muddo (15) casho gudahood ah, laga bilaabo maalinta la gaadhsiiyay go'aanka Guddida.

6. Wasiirku, haddii uu ku qanco in asbaabta diidmada diiwaangelinta guddigu u cuskaday aanay ku filayn, isla markaana u cadaato in codsaduhu buuxiyay shuruudihii xeerkan, macluumaadkiisuna dhab yihiin, wuxuu go'aan sababaysan ku soo saarayaa in ogolaanshaha diiwaangelinta xaalad kasta oo kale wuxuu ayidayaa go'aanka guddida.

7. Codsadaha si xeerkan waafaqsan loo diido codsigiisa diiwaangelinta, isla ururkii la diiday dib u soo codsan karo diiwaangelintiisa muddo sanad gudihii ah.

**Qodobka 16aad**
**Asaaska Dalladaha iyo Bah-wadaagta**

1. Dalad ama bah-wadaag ururo aan Dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan 15 urur oo wadani ah oo diiwaangashan oo shaqeeya, kuwaas oo kawada shaqeeya hal wadaage (sector) ama u adeega koox bulsho oo gaar ah, sida haweenka, Naafada, dhalinyarada, dadka laga tirada badan yahay Iwm. ama uu jiro hadaf guud oo mideeya ama aag juquraafiyadeed oo ay kawa hawlgalaan

2. Dalad ama dan-wadaag waxaa loo abuuri karaa ujeedo ah:

b) Kobcinta iyo dhismaha kartiyeed ee Ururada ku bahoobay

t) Isu-duwida, qiimaynta, kormeerka iyo tayaynta hawlaha iyo barnaamijyada ay ururadaasi fuliyaan

j) Difaacida iyo u ololaynta ururadaa ku bahoobay Dallada ama bah-wadaagta

x) Xalinta khilaafyada bahoobayaasha dhexdooda iyo khilaafka xubnaha dallada ama bah-wadaagta iyo hay'adaha la shaqeeya

Kh) Fududaynta wada shaqaynta, iskaashiga iyo xidhiidhka xubnaha dallada ama bah-wadaagta

3. Waa in xubnaha ku bahoobaya Dallada ama danwadaagta ay qabsadaan shirwayne dhamaan ururada ku bahoobay ergo u soo dirtaan oo ka qayb galaan

4. Shirwaynaha aasaaska Dallad ama Bah-wadaag waa:

b) In ergooyinka ka soo qabgelayaa ay sitaan kalsooni qoraal ah oo Ururada ay metelayaan ah
t) In ay goob-joog yihiin Wasaarada Qorshaynta ergo ka tirsan oo goob-joogenimo kaga qaybgelaysa iyo Guddida USDA;
j) In uu jiraa Xeer-hoosaad ay ku dhisan yihiin oo ku shaqaynayaa oo ergada ururada asaasayaasha intooda badan oo ah tiro aan ka yarayn 15 urur saxeexeen.
x) In ay leedahay ujeedo cad oo xeer-hoosaadka ku qeexan oo loo midoobayo, taas oo waafaqsan tilmaamaha faqrada 2aad ee Qodobkan
Kh) In la isugu doortaa jagooyinkiisa iyo xilalkiisa si dimoquraadi ah oo muuqata (transparent)
d) In jagooyinka iyo xilalka la isugu doortaa urur ahaan ee aanay is dooran shakhsiyaad

**Qodobka-17aad**
**Diiwaangelinta dalladaha USDAW**

Ogolaansho la'aanta diiwaangelinta, racfaanka go'aanka diidmada diiwaangelinta iyo dib u eegistiisa ee Dalladaha iyo bahwadaagta Ururada aan Dawliga ahayn ee wadaniga ah waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobada 15aad ee xeerkan.

**Qodobka-18aad**
**Isku Biirid ama Midaw laba ama ka badan oo USDAW**

1. Laba Urur Samafal aan dawli ahayn oo wadani ah ama ka badan oo diiwaangashan way isku tagi karaan ama way midoobi karaan;
2. Ururka cusub ee ka dhashay midawga ku xusan faqrada hore, dib ayaa loo diiwaangelinayaa, ka dib marka diiwaangeliyuhu, isagoo la tashaday Guddida hubiyo in midawga cusub qaab sharciga waafaqsan loo sameeyay, iyadoo diiwaangelintii ururadii hore ee midawgu saameeyay laga saarayo diiwaanka

## QAYBTA 4AAD
## HEERARKA DIIWAAN-GELINTA

**Qodobka 19aad**
**Sarkaakiisha Diiwaangelinta Gobolada & Degmooyinka**

1. Diiwaan-geliyaha Guud isaga oo ula jeeda in uu fududeeyo Diiwaan-gelinta heerarka Gobol iyo kan Degmo, waxa uu talo ku siin doonaa Wasiirka in uu u magacaabo Diiwaan-geliye gobol kasta iyo degmo kasta.
2. Diwaangaliyaha lagu magacaabay si waafaqsan Qodobkan, waxa uu magaca Diiwaan-geliyaha Guud:
   b) Ku Diiwaan-gelin doonaa Ururka aan Dawliga ahayn ee gobolkaas ama Degmadaas hawl-galkiisu ku kooban yahay;
   t) Ku bixin doonaa Shahaadooyinka Diiwaan-gelinta ee heer Gobol ama Degmo.

**Qodobka 20aad**

**Diiwaan-gelinta ururrada waddaniga ah ee derejooyinka kala duwan leh**

1. Marka Urur aan Dawli ahayn la doonayo in uu ka hawl-galo Degmo gaar ah, codsiga Diiwaan-gelinta waxaa loo soo gudbin doonaa Diwangaliyaha Degmada.
2. Marka Urur aan Dawli ahayni uu doonayo in uu ka hawl-galo Gobol dhammaantii, codsigiisa diiwaan-gelineed waxa uu u gudbin dooona Diiwaan-geliyaha Gobolka.
3. Ururka aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah ee baaxadda hawl-galkiisu uu daboolayo ugu yaraan laba Gobol iyo Ururka aan Dawliga ahayn ee caalamiga ah ama shisheeye waxa diiwaan-gelin doonaa Diiwaan-geliyaha Guud.
4. Marka Diiwaan-geliyaha heer Gobol ama Degmo uu diiwaan-galiyo Urur aan Dawli ahayn, waxa uu samayn doona warbixin iyo xogta ururrada la diiwaan-geliyey, waxaanu u diri doonaa Diiwaan-geliyaha Guud.
5. Wasiirku waxa uu xeer-nidaamiye ku qeexi doonaa habka ay ku hawl geli doonaan diiwaan geliyeyaasha heerka Degmo, Gobol iyo Qaran oo aan ka hor imanayn xeerkan.
6. Ururka Diiwaan-geliye degmo u gudbista codsi diiwaan-gelineed ee laga aqbali waayo, waxa keliya ee uu cabashadiisa u gudbin karaa Diiwaan-geliyaha Gobolka oo go'aan kama-dambeys ah ka qaadan kara.

**Qodobka 23aad**
**Xaqiijinta jiritaanka Urur**

1. Marka Diiwaan-geliyuhu uu ku qanco inuu baaba'ay jiritaanka urur diiwaan-gashanaa, wuxuu soo saari doonaa ogeysiin qoraal ah oo lagu baahin doono faafinta rasmiga ah ama bedelkeeda warbaahinta dalka.
2. Marka Ururka aan Dawliga ahayni ku guul darraysto in uu u soo gudbiyo Diiwaan-geliyaha Guud caddeynta jiritaankiisa muddo soddon cisho ah (30) gudahood, Diiwaan-geliyuhu waxa uu baabi'in karaa shahaadadda diiwaan-gelinta, isla markaana magaceeda ka saari doonaa diiwaanka.

## QAYBTA 5AAD
## MASUULIYADDA XISAABTANKA IYO NIDAAM HOOSAADKA URURRADA AAN DAWLIGA AHAYN

**Qodobka 21aad**
**Sharciyeynta Dan-wadaagta**

1. Waxa la sharciyayn doonaa Dallad/kulan urureed oo ay leeyihiin Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ahi oo hadda ka dib loogu yeedhi doono *"Dan-wadaagta Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah"*.
2. Dan-wadaagtu waxay noqon doontaa madal kulmisa Ururadaas oo looga jeedo isu-duwidda iyo wada shaqaynta dhammaan Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah ee ka hawl-gala Somaliland gudaheeda.

3. Sida loo aasaasayo, doorkeeda shaqo, xuquuqda iyo waajibaadka dan wadaagta, Wasiirkaa ku soo saari doona xeer-nidaamiye, ka dib marka uu la tashado guddida USDA.

**Qodobka 22aad**
**Hab-dhaqanka anshax (Code of Conduct)**

1. Dan-wadaagtu waxay u ban-dhigaysaa ururrada xilliga shir-sannadeedka wax-qabadkeedii sannadkii dhammaaday waxa kale oo ay u diraysaa Ururadaas go'aannada kasoo baxa shir-sannadeedkaas si ay u hirgeliyaan.
2. Hab-Dhaqanka Dan-wadaagta (Code of Conduct) waxaa lagu ansixinayaa Qaraar ka soo baxa Dan-wadaagta shir sannadeedkeeda oo ay kasoo qayb galeen saddex-dalool-laba dalool (2/3) ururrada ku jira Dan-wadaagta, waxaana lagu faafinayaa xeer Wasiir muddo 15 casho gudahood ah, laga bilaabo maalinta la ansixiyay.
3. Hab-dhaqanka iyo Nidaamyada Dan-wadaagtu waa inay waafaqsanaadaan shuruucda iyo siyaasadaha (policies) dalka u yaal, waxaana xaqiijinaya Guddida USDA.

**Qodobka 23aad**
**Wax-qabadka iyo war-bixinaha USDAW**

1. Urur kasta oo aan Dawli Ahayn oo wadani ah, sannad kasta wuxuu diyaarinayaa war-bixinta wax-qabadkiisa oo faah-faahsan, iyadoo la raacayo qaab-tilmaame war-bixineed (reporting format).
2. Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah ee si toos ah uga hela kaalmo dhaqaale deeq-bixiyeyaasha, waxay ku muujin doonaan kaalmadaas ay helaan iyo wixii lagu fuliyey war-bixin-sannadeedkooda ku xusan Qodobkan.

**Qodobka 24aad**
**Dokumentiyada isku-maamulka**

1. Dastuurka iyo dokumantiyada kale ee xubnaha asaaseyaashu ay u gudbiyeen Diiwaan-geliyaha wakhtigii la samaynayay codsiyada Diiwaan-gelinta ama kuwo ka danbeeyay Dastuurka iyo dokumantiyada loo gudbiyay Diiwaan-galiayaha waxay noqon doonaan dokumantiyada lagu salayn doono xukunka ama go'aan-qaadashada lagu kala saarayo – haddii muran yimaaddo.
2. Ma jiri doono Urur aan Dawli ahayn oo hawl-geli doona ama fulin doona hawlahooda si ka hor imanaysa dokumantiyadooda ay u soo gudbiyeen Diiwaan-geliyaha.

**Qodobka 25aad**
**Hawl-galka Ururrada**

1. Ururka aan Dawliga Ahayn ee u diiwaan-gashan si waafaqsan sharcigan waxa uu xaq u leeyahay in uu bilaabo wax-qabadkiisa kuwaasoo ay ka mid yihiin dhaqdhaqaaq mashaarciyeed oo waxtar u leh bulshada iyo sameyn ilo wax-soo saar ku jiheysan joogteynta wax-qabadka Ururka iyo barnaamijyada loo fulinaayo bulshada isla markaana waafaqsan shuruucda dalka.

2. Dakhli-abuurinta ku jiheysan joogteynta hawlaha Ururku waa inay ka muuqataa warbixin - sannadeedka loo soo gudbiyay Guddida ee ku xusan qodobka 23aad ee xeerkan.

**Qodobka 26aad**
**Ogeysiinta bedelaadda dastuurka Ururrada aan Dawliga ahayn**

1. Isbedal kasta oo Dastuurka lagu sameeyo oo ah beddelaad saameyn ku leh ujeedooyinkii hore ee Ururka ama magac, ama magacyo masuuliyiin xafiis, waxa lagu war-gelin doonaa Diiwaan-geliyaha si qoraal ah.
2. Ogeysiinta la siiyo Diiwaan-geliyaha waxa wehelin doona:
   b. Nuqulka go'aanka la gaadhay oo ay saxeexaan mas'uuliinta awoodda u leh sida ku cad dastuurkooda.
   t. Nuqulka Shahaadadda Diiwaan-gelinta haddii qodobada dastuurka Ururka ee la beddelay ay saameyn ku leeyihiin ujeedooyinka hore ee Ururka.
3. Diiwaan-geliyuhu ka dib marka uu helo ogeysiinta waxa uu:
   b) Gelinayaa Diiwaanka dhammaan waxyaabaha la beddelay sida lagu soo gudbiyay ogeysiiska;
   t) Bixin doonaa Shahaado cusub oo diiwaan-gelineed – markii loo baahan yahaydo;
   j) Ka saarayaa Diiwaanka wixii isbeddel lagu sameeyey.

**Qodobka 27aad**
**Sanduuqa maaliyadeed ee Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah**

1. Waxaa la sameyn doonaa sanduuq-maaliyadeed oo ay leeyihiin Ururrada aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah. Sanduuqaas waxa iska kaashan doona xukuumadda, Deeq-bixiyeyaasha, hantiilayaasha gaarka ah (private sector) iyo ururrada aan dawliga ahayn. Sanduuqaasu waxa uu wax ka tari doonaa tababarka, kor-u-qaadidda tayada iyo mugga wax-qabadkooda.
2. Sanduuqan waxa maamulaya Guddida USDA lagu hagaayo tilmaame Wasiirku soo saari doono marka uu la tashi iyo ogolaansho la sameeyo dhammaan cidda ay khusayso.

## QAYBTA 6AAD
## URURADA AAN DAWLIGA AHAYN EE CAALAMIGA AH (USDAC)

**Qodobka28aad**
**Diiwaangelinta USDAC**

Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ahi kama shaqayn karo, kamana fulin karo mashaariic iyo barnaamijyo samafal ama horumarineed Dalka JSL, haddii aanu dalka JSL uga diiwaangashanayn si xeerkan waafaqsan.

**Qodobka 29aad**

**Shuruudaha Diiwaangelinta USDAC**

Ururka aan Dawliga ahayn ee Caalamiga ah ee dalbanaya diiwaangelin, waa in uu buuxiyaa shuruudahan:

1. Waa in uu arji codsi diiwangelin oo ay soo saxeexeen xubnaha asaasyaasha ama cid si shrci ah uga wakiil ah, u soo gudbiyaa Diiwaangeliyaha Guud
2. Waa in uu si rasmi ah uga diiwaangshan yahay dalkiisa, xafiis shaqeeyana ku leeyahay
3. Waa in uu dalkiisa ama dalal kale ka fuliyay mashaaariic la xidhiidha wadaagaha (sector) uu ruqsada u dalbaday,
4. Waa in uu ka haystaa deeqbixiye aan dalka deganayn heshiiska iyo dhaqaalaha mashruuc ama mashruucyo uu dalka ka fulinayo Waa in codsigiisa diiwaangelinta ay weheliyaan:
   a. Ruqsada diiwaangelintiisa ee dalkiisa;
   T. Dhukumentiga xogta urureed/hay'adeed (Profile), oo ay ku qeexanyihiin ujeeddada ururka, qaab-dhismeedka ururka iyo maamulkiisa, Xarunta guud ee xafiiskiisa halka uu yahay iyo cinwaankiisa dalka, Sharciyeyntiisa waddanka uu asal-ahaan kasoo jeedo, Dalalka kale ee uu ka shaqeeyo, xidhiidhka uu la leeyahay;
   J. Nuqul ka mid ah dastuurka ururka oo ay ku caddahay wadaagaha/wadaagayaasha (sector/sectors) ee uu ururku ka hawl geli doona;
   x. Miisaaniyadda dhaqaale ee uu dalka gelinaayo;
   Kh. Qorshe-sannadeedkiisa, iyo guud ahaan ilihiisa dhaqaale;
   d. Cinwaanka iyo meesha uu ku yaallo xafiiska xarunta u ah Ururka;
   r. Caddayntii bixinta Ajuurada diiwaan-gelinta;
   s. Qoraal cadayn ah, oo bixisay Wasaarada Arrimaha dibeda u qaabilsan dalkiisa ama Safaarada dalkiisa ee S/land ugu dhaw oo ay ku cadaynayaan jiritaankiisa, wax-qabadkiisa iyo in ay masuul ka yihiin wixii ka yimaada;
   Sh. Taariikh-nololeedka (CVs) iyo shahadada shaqaalaha ka shaqeyn doona Somaliland iyo sababta loogu baahanyahay iyo caddayn dembi-la'aneed oo wadankiisa ka sita;
   Dh. Taariikh-nololeedka(CVs) asaaseyaasha iyo sawirradooda iyo caddayn dembi-la'aneed oo wadankiisa ka sita;
   C. Qorshaha ururka (workplan) ku tallogaley inu ku shaqeynayo oo ugu yaraan sannad ah iyo misaaniyada ku baxeysa oo madaxya leh (itemized Budget).

5. Waa in mashruuca uu dalka ka fulinayo ujeedooyinkiisa iyo qorshihiisuba waafaqsan yihiin Siyaasadaha, xeerarka iyo qorshayaasha Qaranka.
6. Waa in uu ogolaansho qoraal ah ka haystaa Wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee ku shaqada leh mashruuca ama barnaamijka uu dalka ka fulinayo.
7. Waa in uu mashruuca ama barnaamijka ku fulinayo qorshaha Wasaarada ama Hay'ada xukuumada SL ee hawshaasi khusayso, kana fulinayo goobta/goobaha loo cayimo.
8. Waa in uu ka furanayo Dalka xafiis awood go'aan qaadasho oo buuxda fulinta mashruuca iyo ogolaanshaha kharashkiisa leh.

**Qodobka 30aad**
**Ogolaanshaha & diidmada diiwaangelinta USDAC**

1. Diiwaangeliyuhu markuu helo codsiga diiwaangelinta ee USDAC wuxuu hubinayaa in dhammaan shuruudaha ku sheegan qodobka hore uu buuxiyay, USDAC , isagoo marka uu u arko lama huraan qaadaya talaabooyinkan:

b. In uu dalbado soo dhamaystir macluumaad ama dhukumenti ka dhiman
t. In uu dalbado ama raadiyo cadaymo dheeraado ah
j. In uu warbixin ka dalbado ama xog waraysto Wasaarada ama hay'ada xukuumadeed ee la shaqaynayo USDAC
x. In uu xidhiidh la sameeyo masuuliyiin sare ama cida uu deeqda ka soo qaatay ama u balanqaaday ama cid kale oo cadaymo uga baahdo

2. Diiwaangeliyuhu markuu hubiyo in shuruudaha xeerkan dhamaystiran yihiin, macluumaadka loo soo gudbiyayna xaqiiq yihiin, wuxuu u gudbinayaa Guddida USDA, codsiga oo ay ku lifaaqan yihiin, dhammaan macluumaadka uu ka helay codsadaha, warbixin koobaysa wixii uu talaabooyin qaaday ama xog dheeraada ku helay baadhistiisii oo ay weheliyaan talooyinkiisa.

3. Goluhu, markuu helo macluumaadka faqrada 2aad, wuxuu ka doodayaa jawaabna ka bixinayaa codsiga diiwaangelinta USDAC ama USDASH, iyadoo Goluhu ku soo saari karo go'aan sababaysan oo aqlabiyad ah:

b. In USDAC ee diiwaangelinta soo dalbaday uu u qalmo in la diiwaangeliyo marka uu ku qanco:
t. In uu buuxiyay shuruudaha xeerka ku qeexan
j. In Dhammaan macluumaadkiisu ay dhab yihiin
x. In USDAC ee diiwaangelinta soo dalbaday aanu u qalmin in la diiwaangeliyo, marka ay u cadaato:
   - In aanu buuxin shuruudihii xeerku u dhigay
   - In aanay dhab ahayn macluumaadka uu soo gudbiyay

Kh. In baadhis dheeraada iyo cadaymo kale oo lagu go'aan qaato loo baahan yahay

4. Guddigu marka uu gaadho go'aamada ku qeexan xubnaha (a&b) ee faqrada 3aad ee qodobkan, waxay go'aankooda ogolaashaha diiwaangelinta ama diidmada u gudbinayaa Wasiirka si uu xeer wasiir ugu faafiyo go'aanka Guddida muddo aan ka badnayn (15) maalmood.

5. Wasiirku muddada ku xusan faqrada 4aad ee qodobkan dhexdeeda, marka go'aanka Goluhu yahay diidmo, haddii uu u arko in aanu go'aanku ku dhisnayn asbaab ku filan, wuxuu dib isugu yeedhi karaa Golihii isagoo u soo jeedinaya baadhis dheeraada in ay dib ugu noqdaan.

6. Xaalada faqrada 5aad iyo xubinta (J) ee faqrada 3aad, guddigu wuxuu samaynayaa baadhis, isagoo raacaya talaabooyinka xubnaha faqrada 1aad ee qodobka, dibna u soo saaraya go'aan waafaqsan tilmaamaha (b&t) ee faqrada 3aad ee qodobkan, iyadoo ay markan waajib ku tahay wasiirka in uu xeer ku faafiyo go'aanka guddida (7) maalmood gudahood

7. Xaalada ku xusan faqrada 6aad ee qodobkan, haddii wasiirku ku faafin waayo go'aanka guddida muddada ku xusan faqradaa, waxaa faafinaya go'aanka Gudoomiyaha guddida.

8. Xaaladaha lagu diido diiwaangelinta USDAC ama USDASH, si waafaqsan tilmaamaha faqradaha 3aad, xubinta (t), faqrada 4aad, 6aad & 7aad ee qodobkan, codsaduhu wuxuu racfaan uga qaadan karaa Maxakamada Sare, isagoo raacaya tilmaamaha racfaan, qodobada racfaan qaadashada go'aamada maamul ee kama danbaysta ah.

9. Markasta oo la ogolaado diiwaangelinta USDAC, waxaa go'aanka Guddida loo gudbinayaa Wasiirka oo xeer wasiir ku soo saaraya una gudbinaya diiwaangeliyaha oo diiwaangelinaya isagoo raacaya tilmaamaha faqradaha 4aad, xubinta (b) ee qodobka 15aad ee xeerkan

**Qodobka-31aad**
**Shahaadada diiwaangelinta**

1. USDA ee Caalamiga ah ama shisheeye, marka la diiwaangeliyo, waxaa Diiwaangeliyuhu siinayaa shahaadada diiwaangelinta
2. Shahaadada diiwaangelintu waxaa lagu muujinayaa muddada ay ku dhacayso oo noqonaysa ugu badnaan lix bilood ka dib dhammaadka muddada mashruuca ama barnaamijka loo ogolaaday in uu dalka ka fulinayo.

**Qodobka-32aad**
**Heshiiska hawl-fulin**

1. Marka la diiwaan geliyo ka dib ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah waxay heshiis shaqo (memorandum of understanding) la saxeexanayaan Wasaaradaha, hay'adaha, ururrada iyo xafiisyada kale ee ay khuseyso (partners), nuqul heshiiskaas ahna waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Qorsheynta, iyadoo Diiwaangeliyaha guud uu diiwaangelinayo.
2. USDA oo Caalami ah kama bixi karo, waxna kama bedeli karo heshiiska ku xusan faqrada hore, haddiise ay yimaadaan sababo macquul ah oo USDA, wasaaradii ama hay'adii la gashay, Wasaarada Qorshaynta iyo Guddigu ku wada qanceen oo keenaya in heshiiskii hore wax laga bedelo, waxaa dhinacyadu dib u gelayaan heshiis cusub, iyadoo markasta la raacayo tilmaamaha faqrada hore ee qodobkan.

**Qodobka -33aad**
**Cusboonaysiinta Ruqsada USDAC**

1. USDA ee Caalamiga ah, ee si xeerkan waafaqsan ku diiwaangashanaa ee muddada dhammaadka ruqsadiisa ka hor ka soo hela deeq-bixiye dibadeed dhaqaale mashruuc cusub ama lagu fidinayo muddadii mashruuca hore, wuxuu xoghayaha guddida u gudbinayaa codsi uu ku dalbanayo cusboonaysiinta ruqsada diiwaangelinata, isagoo ku soo lifaaqaya codsigiisa:
   b. Heshiiska ama balanqaadka mashuuca cusub ama fidinta mashuura hore
   t. Warbixinta waxqabadkiisii hore
   j. Cadaynta shaqo wanaaga ee wasaaradii ama hay'adii uu la shaqeeyay
2. Cusboonaysiinta diiwaangelinta waxaa loo raacayaa tilmaamaha qodobka 30aad ee xeerkan inta ka dabaqmi karta.

**Qodobka-34aad**
**Wada shaqaynta USDAW iyo USDAC**

1. Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah waa inay dhiiri-geliyaan maal-gelinta Ururrada Waddaniga ah ee aan Dawliga ahayn (USDAW) kana fogaadaan inay kula tartamaan hawlaha ay qaban karaan ururradaasi si loo xoojiyo tayeynta aqooneed iyo wax-qabad ee ururradaas waddaniga ah.
2. Barnaamijyada Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan). Waa inay

dhiiri-geliyaan, muujiyaan mashaariic wax-ku-ool ah oo la taaban karo, isla markaasna ay kala shaqeeyaan Ururrada Samafalka aan dawliga aheyn (USDA) ee waddaniga ah deegaannada ay ka hawlgalaan kuna badhi-taaraan xoojinta tayadooda aqooneed iyo wax-qabad si loo helo in barnaamijyadaasu sii socdaan siina waaraan oo isku-fillaansho laga gaadho.

3. USDAC, waa in aanay mashaariic fuliye (projects' implementor) u noqon Ururada kale ee Samafalka Caalamiga ah ama shisheeye ama Hay'adaha Qaramadda Midoobay

**Qodobka 35aad**
**Qalabka & Agabka Mashaariicda dhammaatay**

1. USDAC waa in Wasaaradda ay la shaqaynayaan iyo Guddidaba u gudbiyaa tira-koobka sugan ee agabka iyo qalabka mashruuc kasta oo sannadle ah.

2. Markii mashruuc dhammaado, hantida mashruucaas iyo shaqadii socotayba waxaa lagu wareejinayaa lammaanihii waddaniga ahaa ee hawsha la wadday (partners) sida Wasaarad ama Urur waddani ah oo magaceeda lagu xusay heshiiskii mashruuca ee la wada galay. Haddii hantidaas in ka mid ah looga baahdo in loo adeegsado hawl la mid ah tii hore oo dalka ka socota waxa lagu go'aansanayaa wada- tashi dhinacyadu u dhan yihiin.

3. Ururku Samafalka caalamiga ah wuxuu ku wareejinayaa Wasaaradda dhamaan hantida iyo agabka xafiiska marka labada dhinac mid ka mid ahi go'aansado inuu soo afjaro hawl-galadii Ururka

**Qodobka-36aad**
**Cashuurta shaqaalaha & Ajuurada Diiwaangelinta**

1. USDAC waa in cashuurta dakhliga ee ku waajibtay shaqaalaha waddaniga ee u shaqeeya ururradooda ka soo gooyaan una gudbiyaan Wasaaradda Maaliyadda sida ku qeexan xeerarka cashuuraha dakhliga ee dalka.

2. Xadidaadda Ajuurada Diiwaan-gelinta ee Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah ama shisheeye ku waajibtay waxaa Dikreeto ku soo saaraya Wasiirka.

**Qodobka-37aad**
**Warbixinaha USDAC**

1. USDAC waa inay u soo gudbiyaan Guddida USDA iyo Wasaaradda Qorsheynta iyo ciddii kale ee ay la shaqeeyaan war-bixin wax-qabadeed lix bilood leh ah iyo mid sanadle ah. War-bixintaas oo ay ku jiraan arrimaha soo socda:
   - b. Wax-qabadkii fulay, wax-qabadkii baaqday, sababayntii iyo odoroska wax-qabad ee lixda bilood ee soo socda;
   - t. Kharashka miisaaniyadeed ee baxay, inta hadhsan, iyo odoroskeeda mustaqbalka;
   - j. Turun-turrooyinka ama caqabadaha la soo dersay, duruustii laga bartay iyo talo-soo-jeedinta.

2. Wasaaradu ka dib marka ay la tashato Guddida USDA, waxay:
   - b. U yeedhi karaan USDA warbixinta soo gudbiyay si wax uga waydiiyaan macluumaadka la xidhiidha warbixintooda.

t. Baadhis iyo hubin ku samayn karaan xaqiiqda warbixinta USDA ee Caalamiga ah ee ku guuldaraysta soo gudbinta warbixinta ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, Wasiirku wuxuu qoraal digniin xambaarsan ku siinayaa waqti cayiman gudihii in ay ku soo gudbiyaan warbixintooda, isagoo ogaysiin ka siinaya qoraalkaas Guddida USDA iyo Wasaarada ama hay'ada Xukuumadeed ee ay heshiiska wada galeen.

x. Haddii USDA ee Caalamiga ah ee u hogaansami waayo digniinta wasiirka, Guddida USDA markay la tashadaan wasiirka waxay ka gaadhayaan go'aan anshax marin.

**Qodobka-38aad**
**Shakhsiyad Qaanuuneed**

1. USDA waxay leeyihiin shakhsiyad qaanuuneed, wax way dacwayn karaan waana la dacwayn karaa, si xeerarka dalka waafaqsan.
2. Xeerkani ma siinayo dhowrsoonaan (xasaanad) iyo xuquuq diblomaasiyadeed Ururrada ku diiwaan-gashan.
3. Markuu shaqaale ajnebi ah oo u shaqeeya Urur aan Dawli ahayn oo Caalami ah uu bixin waayo qaan-sheegatooyin ama deyn lagu yeeshay, waxa deymahaas loo raaci doonaa ururkii dalka keenay ee uu u shaqaynayey.

**Qodobka-39aad**
**Buugaagata Xisaabta iyo Diiwaannada**

Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee Caalamiga ah waa inay yeeshaan, si buuxdana u dhaqan geliyaan nidaam-xisaabeed dhan oo sax ah oo ka kooban hantidoodda, deymaha, dakhliga iyo kharashaadka si waafaqsan nidaam-xisaabeedka caalamiga ah ee lagu dhaqmo.

**Qodobka-40aad**
**Anshax-marin & Masuuliyad Ciqaabeed**

1. Guddida USDA ayaa talaabo anshax-marin ka qaadaysa USDA ee la yimaada hab-dhaqan ama fal anshax-marin lagu mutaysan karo.
2. Tallaabooyinka anshax-marin ee guddigu qaadan kartaa waxay noqonayaan:
   b. Digniin qoraal ah
   t. Cannaan qoraal ah
   j. Ganaax
   x. Ka hakin ruqsada diiwaangelinta muddo cayiman
   Kh. Ka laalis ama kala noqosho ruqsadeed
3. Wasiirku wuxuu xeer-nidaamiye faah-faahsan ku soo saarayaa:
   b. Hab-dhaqanada iyo falalka USDA ay anshax-marin ku mutaysan karan Falkasta ama ab-dhaqan kasta talaabada anshax-marin ee ay mutaysan karaan USDAW, USDAC
   j. Hab-raaca anshax marinta
   x. Habka fulinta talaabada anshax-marineed
   Kh. Ganaaxa xaddiga ganaaxa ugu badan iyo falalka lagu mutaysan karo
   d. Muddada ruqsada la hakin karo

r. Cawaaqibka ka dhalan kara iyo habka loo maaraynayo

4. Go'aamada anshax-marineed, waxaa looga caban karaa habka cabashada go'aamada maamul ee kama danbaysta ah.

5. Falkasta oo denbi ciqaabeed ka dhalanayo oo lagu jebiyo xeerkan ama xeerarka ciqaabeed ee dalka ee qof shaqaale ahi galo waxaa masuuliyadeeda qaadaysa ciddii gashay, iyadoo loo marayo hab-raaca denbiyada ciqaabta.

## QAYBTA 7AAD
## QODOBO KALA DUWAN

### Qodobka – 41aad:
### Arrimaha Shaqada

Arrimaha shaqada la xidhiidha waxa lagu dhaqayaa xeerka shaqaalaha rayidka ee Somaliland. heshiis shakhsi ama wadareed oo dheef (faa'iido) sareysa ama badbaadin shaqo oo ka badan tan Xeerka Shaqaalaha, waa lala geli karaa shaqaalaha.

### Qodobka – 42aad
### Daabacaadda/faafinta

Guddida USDA, oo kaashanaya diiwaangeliyaha guud waxay sannad kasta ku daabici doonaa faafinta rasmiga ah ama warbaahinta gudaha magacyada:

b. Dhammaan Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee la diiwaan-galiyay;
t. Dhammaan Ururrada Samafalka aan Dawliga aheyn (USDA) ee is ba'abiyey ama iskood u burburay;
j. Dhammaan Ururada aan Dawliga Ahayn ee Diiwaanka laga saaray si xeerkan waafaqsan.

### Qodobka – 43aad
### Dib u qiimayn & Dib u diiwaangelin

1. Marka la dhamaystiro dhismaha Guddida USDA, Diiwaangeliyaha guud iyo Diiwaanka guud, isla markaana la soo saaro xeer-nidamyada xeerkani waajibiyay, Wasiirku isagoo la tashaday Guddida wuxuu soo saarayaa hage faahfaahsan oo dib loogu qiimeeyo, dibna loogu diiwaangeliyo, Ururada Samafalka aan Dawliga ahayn, ee wadaniga ah ama Caalamiga ah ee hore uga diiwaangashanaa dalka xeerkan ka hor.

2. Guddigu isagoo hagahaa raacaya, wuxuu dib u diiwaangelinayaa USDA ee hore dalka uga diiwaangashanaa, wuxuuna soo saarayaa liiska USDA ee dalka ka diiwaangashan

### Qodobka-44aad
### Xeer-nidaamiye

Wasiirku isaga oo la tashanaya Guddida USDA wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye uu dhamaystirayo kuna fulinayo xeerkan

**Qodobka – 45aad**
**Luqadda Xeerkan**

Afka (luqadda) Xeerkani waa af-Somaali, haddii af-kale lagu minguuriyo (lagu tarjumo), oo is-maan-dhaaf ka yimaaddo, waxa loo noqonayaa nuxurka nuqulka Af-Soomaaliga ah.

**Qodobka – 46aad**
**Laalid ama tirtid**

Xeerkani markii la ansixiyo waxa uu laalayaa dhamaan xeerarkii ka horreeyey ee la ujeeddo ahaa ee ka hor imanaya nuxurkiisa.

**Qodobka-47aad**
**Dhaqangal**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan Golayaasha sharcidejintu M/waynuhuna saxeexo.